

Baarista kadib si aadan si «khaldan» wax ugu liqin.

Dhakhtarkii kusoo diray ayaa natijada baarista loogu sheegayaa maalmo gudahood. Haddii cad yar oo tijaabo ah lagaa qaaday, waxaa uu dhakhtarkii kusoo diray helayaa natijada baarista qiyaastii 4-6 toddobaad kadib.

Dhakhtarka isbitaalku ma qorayo warqad jirro maalinta baarista, laakiin waxaad heli kartaa caddayn in aad timid baarista.

### Dhibaatooyin?

Waxa aad u yar dhibaatooyin ka dhasha baaristaan caafimaad ee dheef-mareenka, caloosha iyo mindhicirka. Haddii markaad guriga tagtid kadib ay xaaladdaada caafimaad xumaato, waxaad la xiriiraysaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka ee qaybaan caafimaadka guud ee isbitaalka telefoonka: 23 22 50 00.

## Baarista dheef-mareenka, caloosha iyo qaybta kore ee mindhicirka

Gatroskopi



OGOW!

Si wanaagsan u akhri warbixinta ku saabsan u diyaargaroobidda baarista



Lovisenberg Diakonale Sykehus

Lovisenberg Diakonale Sykehus  
Medisisnk poliklinikk  
Lovisenberggt. 17  
Telefon: 2322 5720

Gastroskopi 01-202 Somali



Lovisenberg Diakonale Sykehus

## **Waa maxay gastroskopi?**

Gastroskopi waa baaris caafimaad oo qusaya dheef-mareenka, caloosha iyo qaybta kore ee mindhicirka (laba-iyo-toban-farood le'ekaha). Tuubbo loodsamaysa ayaa la gelyaa afka. Waxaa baarista lagu heli karaa isbeddello ku samaysmay xuubabka gudaha, waxaa lagu cilaajin karaa xaalado jirro ama waxaa lasoo goyn karaa nudayaal (cad yar) si loo baaro.

## **Xanuunka Celiac?**

Haddii ay baarista ku jirto in lagaa baaro xanuunka Celiac (Celiaki), waa in aad bilowday in aad cuntid cunto leh maaddada gluten ugu yaraan 6 toddobaad kahor baarista si loo ogaado sida uu jidhkaagu, haddii taasi jirto, uga fal-celinayo maaddada gluten.

Haddii baaristu ay tahay koontarool sannadle ah oo la xiriira daweynta xanuunka Celiac taasoo la dejiyey cunto xaddidan, waxaad markaas baarista kahor soo cunaysaa cunto aanay ku jirin maaddada gluten.

Haddii aad shakisan tahay, nala soo xiriir!

## **U diyaargaroobidda baarista**

**Waa inaad soontaa 6 saacadood baarista kahor. Taas micneheedu waa in aadan waxba cunin 6-daas saacadood.**  
**Waxaad cabbi kartaa hal bakeeri oo biyo ah ilaa 2 saacadood ka hor baarista haddii aad oomman tahay.**

## **Dawooyin iyo jirrooyin kale**

Waa inaad na siisaa wixii warbixina oo ku saabsan dawooyin aadan u adkaysan karin, iyo jirrooyin aad qabtid sida xanuunka wadnaha marka dhiiggu ka hakado (angina pectoris), cillad wadnaha ah ama dhibaatootin dhiig-bax, maadaama ay taasi saamayn ku yeelan karto doorashada sida hawsha loo qabanayo

## **Dawooyin saameeya muddada dhiig-baxa:**

- Haddii aad isticmaashid **Albyl-E**, waad sii wadi kartaa inaad qaadatid ilaa maalinta baarista haddii aadan helin farriin taas ka duwan.
- Haddii aad isticmaashid **Plavix/Brilique/Efient**, nala soo xiriirtid

hawl-galka kahor.

- Haddii aad isticmaashid **Xarelto/Eliquis/Pradaxa**, jooji 2 maalmood hawl-galka kahor.
- Haddii aad isticmaashid **Marevan**, waa inaad joojisid 3 maalmood kahor hawl-galka iyadoo xinjirobistana (INR) lagu koontaroolayo shaybaarkayaga. Sidaa awgeed waa inaad timaaddaa ugu yaraan 1 saac kahor baarista adigoo farriintaan ka sheegaya daaqadda qaabiliaadda ee Rugta caafimaadka bukaan-socodka (medisinsk poliklinikk).
- Haddii galliin lagugu gelyey waal-wadneed (hjerteklaff), **waa inaad lasoo xiriirtid rugta caafimaadka** si loo diyaariyo in lagaa beddolo Marevan oo laguugu beddolo Fragmin kahor baarista.

## **Dawooyinka gaaska/aasidhka yareeya.**

Sida: Omeprazol, Esomeprazol (Losec/Nexium), Pantoprazol (Somac) ama Lanzoprazol (Lanzo),

**waa inaad joojisaa 7 maalmood baarista ka hor haddii aan farriin taas ka duwan lagu siin.**

Dawooyinka kale ee asiidhka yareeya, laguna magacaabo ka-hortagayaasha H2-da sida Tagamet, Pepcid iyo Zantac,

- **waa inaad joojisaa isticmaalkooda 2 maalmood ka hor baarista.**

## **Baarista laftigeeda**

Baaristu waxay caadi ahaan qaadataa 5-10 daqiiqadood. Haddii aad u baahatana waxaa xididka laguu marinayaaw dawada dejisada ah taasoo uu go'aamiyo dhakhtarka daaweynta.

## **Baarista kadib**

Haddii lagu siiyey dawada dejisada ah, waa inaad ku nasatid waaxda gudaheeda 1-2 saacadood kadib baarista. Maalinta baarista baabuur ma kaxayn kartid.

Haddii kabuubyeyn cunaha ah oo kaliya lagugu sameeyey, gurigaaga ayaad aadi kartaa wax yar kadib baarista.

Waa inaad sugtid inaad wax cunto ama cabto 30-60 daqiiqadood